

Waa Maxay Cudurka Laba Qofeyntu (Bipolar Disorder)?

Cudurka Laba Qofeyntu Waa Cudur Culus

Dadka qaba cudurka laba qofeynta waxa ay yeelan karaan isbeddel niyad ah oo aad u weyn. Marmarka qaarkood waxay dareemi karaan niyad-jab (diiqad/murugo) (depression). Marmarka qaarkoodna waxay dareemi karaan niyad aad u kacsan (mania). Marka uu ku soo maro xilli ah niyad-kac ama diiqad/murugo waxa taa loo yaqaanaa dhacdo (episode). Calamadee dhamaan dhacdooyinka aad isku aragtay. Dhakhtarkaaga kala hadal dhacdooyinka.

Noocyada Dhacdooyinka

□ Diiqad (Hoos)

Dadka qaba niyad-jab waxay dareemi karaan murugo weyn. Waxa laga yaabaa inaanay xiitaa doonin inay ka soo degaan sariirta ama ay wax cunaan. Kama helaan sameynta waxyaabihii ay hore u sameyn jireen. Waxa laga yaabaa inay ku fikirnaan inay naftooda waxyeelaan ama is dilaan.

□ Niyad-kac (Sare)

Niyad-kacu waa dhinaca kale ee uu leeyahay cudurka laba qofeyntu. Niyad-kacu waxa uu ku bilaabmi karaa dareen fiican. Ama waxa laga yaabaa inuu qofku noqdo mid aad u xanaaq dhow oo cadheysan. Dadka qaba niyad-kaca waxay sameyn karaan waxyaabo aad halis u ah.

□ Niyad-kac Yar (Hypomania)

Niyad-kaca yar waa niyad-kac ah khafiif. Waxa laga yaabaa in qofku uu dareemo wacnaan. Waxa laga yaabaa inay u maleeyaan in hawl badani u qabsoontay. Laakiin waxa heerka “dareenka wacnaantu” isku beddeli karaa niyad-kac buuxa ama diiqad/murugo.

□ Isku-dhafan

Dareenka niyad-kaca iyo diiqadu waxa kale oo ay noqon karaan kuwo midba midka kale beddelo isku maalin. Waxa taa la yidhaahdaa dhacdo isku-dhafan. Qofka qaba dhacdo isku-dhafan waxa uu halis u noqon karaa isdilis.

Cudurka laba qofeyntu waa cudur nolosha qofka oo dhan jira. Laakiin maanta waxa jira daweyn badan oo loo heli karo dadka qaba cudurkan. La shaqee dhakhtarkaaga si loo helo waxa adiga kuugu fiican.